
hagaha

Khayraadka Sharciiga



Xafiiska Qareenka Degmada Anoka

Tony Palumbo, Qareenka Degmada

Shaxda Tasmada

Farriin ka socota Qareenka Degmada.....	1
Kusaabsan Xafiiskayaga.....	2
Raadinta Caawin Sharci.....	3
Khayraadka Arrimaha Shakhsiyeed.....	4
Khayraadka Macmiilka & Waxyaalaha kale.....	5
Xuquuqda Dhibbanaha.....	6
Xallinta Cabashooyinka Yaryar.....	7
Diiwaanka Qareenka Magaalada.....	8

Gacaliyayaal Jaararka Degmada Anoka,


Xafiiska Qareenka Degmada Anoka wuxuu ku dadaalayaa inuu ilaaliyo dadwaynaha wuxuuna gacan ka gaystaa bulshada in si fiican loo maamulo isagoo dacwaynaya dambiilayaasha, ilaalinaya carruurta iyo dadka qaangaarka ah ee nugul, oo taageeraya dhibbanayaasha.

Intaas waxaa dheer, Qareenka Degmadu waa la-taliyaha sharciga ee Guddiga Degmada, saraakiisha degmada, iyo waaxaha degmada. Hase yeeshee, xafiiskayagu ma siin karo talo sharciyeed dadka ama kooxaha deegaanka.

Mararka qaarkood, qof ama qoys ayaa u baahan caawimo si ay uga gudbaan dhibaato sharci. Inkastoo aan awoodi karin inaan ka caawiyo dhibaatooyinka sharci ee shakhsiga ah, haddana maadaama aan ahay Qareenka Degmada waxaan rabaa inaan bixiyo liiskan khayraadka maxaliga ah si aan kaaga caawiyo xallinta arrimahaaga sharciga.

Si Daacadnimo Leh,

Tony Palumbo



Tony Palumbo
Qareenka Degmada Anoka

Kusaabsan Xafiiskayaga

Xafiiska Qareenka Degmada Anoka wuxuu ka kooban yahay in ka badan 100 shaqaale ah oo ka wada shaqeeya ilaalinta amniga dadwaynaha iyo danaha guud. Xafiiskayagu wuxuu u qaybsan yahay lix qaybood.

QAYBTA MADANIGA (CIVIL DIVISION): Waxay siisaa adeegyo sharciyeed Guddiga Degmada Anoka, saraakiisha degmada, iyo waaxaha degmada. **(763) 324-5550**

→ **QAYBTA ADEEGYADA ILAALINTA (PROTECTIVE SERVICES UNIT):** Waxay siisaa adeegyo sharciyeed Adeegyada Bulshada ee Degmada Anoka iyo Waaxda Caafimaadka Habdhaqanka ee meelaha wacmarka shacabka, ilaalinta dadka waaweyn, liisan siinta xannaanada daryeelka dadka waawayn iyo carruurta, iyo liisan siinta daryeelka qoyska carruurta. **(763) 324-5550**

QAYBTA DEMBIYADA (CRIMINAL DIVISION): Waxaay dacwaysaa dadka waawayn ee lagu soo eedeeyey dambiyada halis ah iyo dhallinyarta loo xukumdo sida dadka waawayn. **(763) 324-5450**

QAYBTA SHARCIGA QOYSKA (FAMILY LAW DIVISION): Waxay la shaqaysaa Adeegyada Taageerada Ilmaha si loo dhiso waajibaadyada aabanimada iyo masruufka carruurta, fulinta waajibaadyadan, dib u eegista amarrada taageerada ilmaha, iyo hawlaha kale. **(763) 324-5550**

QAYBTA DHALLINYARTA (JUVENILE DIVISION): Waxa lagu dacweeyaa dhallinyarta lagu eedeeyey dambiyada, waxayna ilaalisaa carruurta nugul waxayna raadisaa tallaabo maxkamadeed si loo siiyo jawi joogto ah, oo ammaan ah carruurta la dayacay ama lagu gaboodfalay. **(763) 324-5450**

ADEEGYADA DHIBBANAHA/MARAGGA (VICTIM/WITNESS SERVICES): Waxay siisaa adeegyo taageero si loo caawiyo dhibbanayasha iyo maragyada dambiyada, caawisana inta ay kujiraan hawsha nidaamka caddaaladda dambiyada. **(763) 324-5540**

QAYBTA BAADHISTA (INVESTIGATION DIVISION): Waxay baadhaa dambiyada xafiisyada, dhiigmiirashada dhaqaale ee dadka da'da ah, xatooyada daryeelka, cabashooyinka daynta, iyo arrimaha shaqaalaha ee gudaha. **(763) 324-5450**

Raadinta Caawin Sharci

Waxaa jira laba nooc oo kiisaska sharciga ah: dambi iyo madani.

Kiiska dambigu wuxuu ku lug leeyahay tallaabada ay dawladdu ka qaaddo qofka sharciga jabiya. Kiisaska madaniga ah waxay ku lug leeyihiin dadka, shirkadaha gaarka ah, ama dawladda oo tallaabo sharci ah ka qaadaysa dadka kale, shirkadaha gaarka ah, ama dawladda.

RAADI GARYAQAAN: Si aad u hesho qareen, waxaad ka raadin kartaa buugaagta mfindalawyer.com, mnlegalservices.org, lawhelpmn.org, ama anokabar.com. Khayraad dheeraad ah waxay ku taxan yihiin mncourts.gov hoos timaada “Mawduucyada Caawimada” iyo “Raadso Qareen.”

JUDICARE (CAAWIMADA GARSOORKA): Haddii aad kujirto kiis sharci oo aanad awood u lahayn qareen, waxaad u-qalmi kartaa adeegyada Caawimada Garsoorka. Waa inaad tahay deggane Degmada Anoka. Macluumaadka waxa laga heli karaa anokajudicare.org ama (763) 783-4970.

ADEEGYADA MAALINTA CENTRAL MINNESOTA: CMLS waxay siisaa caawimo sharci oo lacag la'aan ah oo loogu talagalay dadka iyo qoysaska dakhligoodu yar yahay arrimaha sharciga madaniga ah. Si aad u hesho macluumaad, booqo centralmnlegal.org ama wac (612) 334-5970.

DIFAACAHA DADWAYNAHA: Haddii lagugu soo oogay dAmbi, waxaad codsan kartaa difaacaha dadwaynaha maxkamadaada koowaad. U-qalmidda waxay ku salaysan tahay awooddaada aad ku bixin karto kharashka. Wixii macluumaad ah, la xirii Guddiga MN ee Difaaca Dadwaynaha pubdef.state.mn.us ama (612) 349-2565, ama Xafiiska Difaacaha Dadwaynaha Degmada Anoka (763) 422-3350.

MAAMULAHA MAXKAMADDA: Cabashooyinka ama walaaca ku saabsan sida garsoorka uu u guddoomiyey dhagaysi maxkamadeed ama dacwadeed, la xirii Maamulaha Maxkamadda 10aad ee Garsoorka Degmada (763) 279-0179.

GUDDIDA MASUULIYADDA XIRFADDA GARYAQAANADA: Si aad u gudbiso cabasho ku saabsan anshax xumada garyaqaan, wac (800) 657-3601 ama (651) 296-3952, ama booqo lprb.mncourts.gov.

MAKTABADDA SHARCIGA: Maktabada Sharciga ee Degmada Anoka, oo ku taal dabaqa koowaad ee maxkamadda, waxay bixisaa qalabka cilmibaarista iyo kaalmada tixraaca ee sharciga. Maktabaddu waxay sidoo kale martigalisaa Rugaha Sharciga ee Qoyska, halkaas oo aad ka heli karto talo sharci oo bilaash ah. Si aad u hesho macluumaad, wac (763) 324-5560.

Khayraadka Arrimaha Shakhsiga

ILAALINTA QOFKA WAYN: Macluumaad guud iyo khayraad, booqo elderjusticemn.org. Si aad u soo sheegtid gaboodfal, dayacaad, ama ka faa'idayasi dhaqaale ee waayeelka ama dadka waawayn ee nugul, wac Xarunta Warbixinta Gaboodfalka Dadka Waawayn ee Minnesota **844-880-1574** (lacag la'aan).

TAAGEERADA ILMAHA: Wixii su'aalo guud ah, wac Xarunta Wicitaanka Kaalmada Dhaqaalaha ee Degmada Anoka **(763) 324-2420** ama booqo websaytka Waaxda Minnesota ee Adeegyada Aadanaha: dhs.state.mn.us. Si aad si toos ah ugu hesho macluumaadka kiiska, isticmaal websaytka Onlaynka Taageerada Ilmaha ee Minnesota: www.childsupport.state.mn.us.

WACADMARYADA: Si aad u bilawdo dacwad wacadmar ee xanuunka maskaxda ama ku-tiirsanaanta kiimikada, la xiriiir Baadhista Codsiga-Hortii ee Degmada Anoka **(763) 324-1420**.

TAKOORKA/DHIBAATAYNTA: Wixii walaac ah ee ku saabsan dhibaataayn ama takoorid, la xiriiir Waaxda Minnesota ee Xuquuqda Aadanaha **(651) 539-1100** ama booqo mn.gov/mdhr.

XADGUDUBKA QOYSKA AMA WEERARKA GALMADDA: Dhibbanayaasha xadgudubka guriga ama weerarka galmada waxay soo wici karaan khadka caawinta 24-ka saacadood oo ay maamusho Alexandra House **(763) 780-2330**. Si aad u hesho hoy deegaanka ah, wac khadka Qalalaasaha Xadgudubka ee Minnesota **(866) 223-1111**. Xaaladda degdegga ah, wac **9-1-1**.

DHEXDHEXAADIN: Dhexdhexaadintu waa hab lagu xalliyo khilaafaadka - oo ay ku jiraan arrimaha xaafadaha, ganacsiga, qoyska, ama dadwaynaha - iyada oo aan maxkamad la aadin. Wixii caawimo ama macluumaad ah, la xiriiir Adeegyada Dhexdhexaadinta ee Degmada Anoka **(763) 422-8878** ama booqo mediationservice.org.

AMARKA ILAALINTA/AMARKA XANNIBISTA: Waxaad codsan kartaa Amarka Ilaalinta ee gaboodfalka guriga, garyaqaan la'aan, adigoo la xiriiraya Maxkamada Degmada Anoka **(763) 422-7389**. Khayraad dheeraad ah ayaa sidoo kale laga heli karaa Alexandra House **(763) 780-2330**.

UNITED WAY 2-1-1: Khadkan 24ka saacadood ee macluumaadka iyo gudbinta ayaa kaa caawin kara inaad la xiriirto adeegyada cuntada, guryeynta, shaqada, gaadiidka, caafimaadka iyo in ka badan - gudaha ama dibadda Degmada Anoka. Wac **2-1-1** taleefan kasta. Macluumaad dheeraad ah gtcuw.org.

Khayraadka Macmiilka & Waxyaalaha kale

XAFIISKA QAREENKA GUUD EE MINNESOTA: Si aad wax uga waydiiso sharciyada iyo ilaalinta macaamiisha, ama si aad cabasho uga gudbisid ganacsi, wac (651) 296-3353 ama (800) 657-3787, ama booqo ag.state.mn.us.

XAFIISKA GANACSI WACAN: Si aad u hesho macluumaad ku saabsan ganacsi ama u soo gudbiso cabasho, booqo bbb.org ama wac (651) 699-1111.

WAAXDA MN EE AMMAANKA DADWAYNAHA: Adeegyada darawalka, wac (651) 297-3298. Adeegyada gaadiidka, wac (651) 297-2126. Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo dps.mn.gov.

WAAXDA MN EE KHAYRAADKA DABIICIGA AH: Macluumaadka la xiriira qaynuunka ugaadhsiga iyo kalluumaysiga, la xiriir DNR (651) 296-6157 ama (888) 646-6367, ama booqo dnr.state.mn.us.

HEERARKA SHAQAALAHA: Macluumaad ku saabsan xaaladaha shaqada, mushaharka ugu yar, shuruucda shaqada ee carruurta, magdhawga shaqaalaha, iyo heerarka kale ee shaqada, ama si aad u soo gudbisid cabasho, wac Waaxda Minnesota ee Shaqaalaha iyo Warshadaha (651) 284-5070 ama booqo dli.mn.gov.

GUDDIDA KHIDMADDA DHEXDHEXAADINTA: Si aad u soo gudbiso cabasho ka dhan ah qareen Degmada Anoka oo ku saabsan khidmado xad dhaaf ah, la xiriir Ururka Qareenada Degmada Anoka anokabar.com ama anoka@anokabar.com.

TARJUMAANADA: Haddii aad ku hadasho Ingiriisi xaddidan aanad ku hadlinba, ama haddii maqalkaagu liito, waxaad xaq u leedahay maxkamadda tarjumaan aad ku haysato. Wixii macluumaad ah, wac Barnaamijka Tarjumaanka Maxkamadda Laanta caddaaladda Minnesota (651) 297-5300 ama booqo mncourts.gov oo dooro “Mawduucyada Taageerada”, “Barnaamijka Tarjumaanka Maxkamadda.”

URURKA MAGAALOOYINKA MINNESOTA: Su’aalaha guud ee ku saabsan awoodaha magaalada, sida kala-xadaynta, qawaaniinta, iyo golaha deegaanka, wac (651) 281-1200 ama (800) 925-1122, ama booqo lmc.org.

KIRAYSTAHA/MULKIILAHA: Macluumaadka ku saabsan qawaaniinta kiraystaha iyo mulkiilaha, booqo ag.state.mn.us ama la xiriir Xafiiska Qareenka Guud ee Minnesota (651) 296-3353 (Twin Cities metro) ama (800) 657-3787 (dibadda Labada Magaalo ee Mataanaha ah); TTY: (651) 297-7206 ama (800) 366-4812. Macluumaadka waxaa sidoo kale laga heli karaa mncourts.gov oo hoos timaada “Mawduucyada Caawimada” iyo “Arrimaha Mulkiilaha iyo Kiraystaha.”

Xuquuqda Dhibbanaha

Yoolka qaybta Adeegyada Dhibbanaha/Maragga ee Anoka waa inay siiyaan dhibbanayaasha iyo maragyada adeegyada taageerada iyo gargaarka ay u baahan karaan si ay ula tacaalaan dambiga laftiisa iyo kadib hannaanka caddaaladda dambiga.

Dhibbanayaasha iyo maragyadu waxay xaq u leeyihiin:

- Macluumaad sax ah
- Inaan la cabsi galin
- In lala socodsiiyo magdhawga khasaaraha dhaqaale
- In la ogaysiiyo wadahalada qirashada
- In la ogaysiiyo isbeddelada jadowalka maxkamadda
- Dalbasha dadajinta dacwadda
- Goobta sugitaanka maxkamadda oo gooni ah
- Inay joogaan xukunka ciqaabta iyo inay fursad u helaan inay jeediyaan bayaanka saamaynta dhibbanaha
- Inay codsadaan ogaysiin sii-daynta dambiilaha
- Inay fishaan wakhtiga iyo dhibaata ugu yar marag ahaan

Xafiiska Qareenka Degmada Anoka

Adeegyada Dhibbanaha/Maragga

(763) 324-5540

victimwitness@co.anoka.mn.us

Xallinta Cabashooyinka Yaryar

Maxkamadda Heshiisiinta, ama Maxkamadda Cabashooyinka Yaryar, waxay u oggolaataa degganayaasha in ay tallaabo ka qaadaan dadka ama ganacsiyada garsooraha hortiisa iyada oo aanu jirin hannaan adag, kharashaadka maxkamadda sare, ama kharashka qareenka. Maxkamaddu waxay dhageysan doontaa cabashooyinka magdhowga lacageed, khasaare, ama dayn ilaa \$15,000.

Cabashooyinka waxa qofku intuu tago ka xerayn karaa Maxkamadda Degmada Anoka ama isagoo wacaya Ku-xigeenka Maxkamadda Heshiisiinta oo codsanaya foomamka. Si aad uga xereysid maxkamadda, foomamka waa in nootaayo la soo mariyey waana in khidmadda xeraynta la bixiyey.

Xukunka maxkamaddu badanaa wuxuu ku xaddidan yahay Degmada Anoka. Shaqaalaha Maamulka Maxkamadda waxay ku wargalin doona dhinacyada ku lugta leh ee taariikhda iyo wakhtiga dhageysiga marka la muddeeyo.

Dhageysiga, dadka cabanayaa waa inay ugu sharraxaan garsooraha, si cad, oo macquul ah, sababta eedaysanaha lacagta ugu leeyihiin ay sheeganayaan. Dadka cabanayaa waa inay awoodaan inay bixiyaan dukumentiyada iyo/ama maragyo dhageysiga, si ay u taageeraan cabashadooda.

Garsooruhu wuxuu go'aamin doonaa in wixii khasaare ah la soo celin karo. Waxay ku xiran tahay qofka garsoorka ku guulaysta inuu lacag ka qaato cidda guuldarraystay.

Maxkamadda Degmada Anoka
2100 3rd Avenue, Anoka, MN 55303

Ku-xigeenka Maxkamadda Heshiisiinta
(763) 760-6801

Macluumaadka onlaynka ah
mncourts.gov (Riix “Help Topics”)
anokacounty.us/courts (Riix “Services”)

Diiwaanka Magaalada

Wixii su'aalo ah ee ku saabsan dacwad ku oogidda dambiyada yaryar, dambiyada culculus, xadgudubyada ku lugta leh shuruucda magaalada, ama arrimaha ku lug leh dawladda hoose, la xiriir magaalada si aad u codsato qareenka magaalada.

ANDOVER:

(763) 755-5100
ci.andover.mn.us

ANOKA:

(763) 576-2700
ci.anoka.mn.us

BETHEL:

(763) 434-4366
bethelmn.govoffice2.com

BLAINE:

(763) 784-6700
blainemn.gov

CENTERVILLE:

(651) 429-3232
centervillemn.com

CIRCLE PINES:

(763) 784-5898
ci.circle-pines.mn.us

COLUMBIA HEIGHTS:

(763) 706-3600
ci.columbia-heights.mn.us

COLUMBUS:

(651) 464-3120
ci.columbus.mn.us

COON RAPIDS:

(763) 755-2880
ci.coon-rapids.mn.us

EAST BETHEL:

(763) 367-7840
ci.east-bethel.mn.us

FRIDLEY:

(763) 571-3450
ci.fridley.mn.us

HAM LAKE:

(763) 434-9555
ci.ham-lake.mn.us

HILLTOP:

(763) 571-2023
hilltop.govoffice.com

LEXINGTON:

(763) 784-2792
ci.lexington.mn.us

LINO LAKES:

(651) 982-2400
ci.lino-lakes.mn.us

NOWTHEN:

(763) 441-1347
nowthenmn.govoffice2.com

OAK GROVE:

(763) 404-7000
ci.oak-grove.mn.us

RAMSEY:

(763) 427-1410
ci.ramsey.mn.us

SPRING LAKE PARK:

(763) 784-6491
slpmn.org

ST. FRANCIS:


(763) 753-2630
stfrancismn.org

LINWOOD TOWNSHIP:

Arrimaha madaniga, la xiriir qareenka magaalada (651) 462-2812
www.linwoodtownship.govoffice.com

Arrimaha dambiyada, la xiriir Xafiiska Qareenka Degmada Anoka
(763) 324-5450

Degmada Anoka, Minnesota



Yaanu nahay

Qareenka Degmada waa sarkaal la soo doortay oo ku hoggaaminaya xafiisku inuu fuliyo waajibaadkiisa. Xafiiskan:

- Wuxuu dacweeyaa dambiyada dadka waawayn ee ka dhaca degmada
- Waxay dacwaysaa dambiyada dhallinyarada ee ka dhaca degmada
- Waxay siisaa la-talin sharci Guddida Degmada iyo waaxaha degmada.
- Waxay wakiil ka tahay degmada cabashooyinka madaniga ah
- Waxay bilawdaa tallaabooyin sharci ah si loo ilaaliyo carruurta lagu gabooodfalay/la dayacay iyo dadka waawayn ee nugul, waxay caawisaa fulinta masruufka ilmaha, waxayna maaraysaa wacadmaryada caafimaadka maskaxda, oo ay ku jiraan dadka jinsiga ahaan khatarta ah
- Waxay bixisaa dadaallada looga hortagayo dambiga oo gacan ka gaysanaya abuuridda bulsho caafimaad qabta oo ammaan ah

Himilada Xafiiska Qareenka Degmada Anoka waa inuu raadsado caddaalad, u doodo xuquuqda muwaadiniinta, oo uu hoggaamiyo bulshada isaga oo diiradda saaraya ka hortagga dambiyada iyo xukunka caddaaladda ah.

Nala soo Xiriir

Waxaanu ku naalaa Xarunta Dawladda ee Degmada Anoka, ee geeska Jidka Wayn iyo dhismaha 3aad ee Magaalada Anoka.

2100 3rd Avenue, Suite 720

Anoka, Minnesota 55303

(763) 324-5550

anokacounty.us/attorney

attorney@co.anoka.mn.us



Anoka County Attorney

TONY PALUMBO

Justice, Advocacy, Prevention.

Qareenka Degmada Anoka

TONY PALUMBO

Caddaaladda, U-doodista, ka Hortagga.